## CAAFIMAADKA IYO AMAANKA

Gudiga waxbarashada waxoo aqoonsan yahay in amaanka ardayda, shaqaalaha iyo dadweynaha oo muhiim u yahay dhamaan hawlaha dugsiga. Waa nidaamka Gudiga in la siiyo jawi amaan iyo badbaado leh dhamaan ardayda, shaqaalaha iyo booqadayaasha sida sharciga ah u soo galo hantida Degmada ama u safrida ujeedooyinka Degmada. Siyaasadaan waxaa loogu talagalay:

1. In lagu caawiyo ka hortaga shilalka, jirooyinka iyo dhaawacyada;
2. In lagu kordhiyo wacyigelinta amaanka iyo in lagu dhiso mas'uuliyadaha badbaadada xubnaha bulshada iskoolka;
3. In lagu hogaamiyo deegaanka, caafimaadka shaqada, iyo sharciga amaanka iyo xeerarka; iyo
4. In lagu dhimo masuuliyadda.

<u>Shuruudaha Guud ee Dhamaan Xarumaha Degmada</u>

Shaqaalaha, ardayda, iyo dadweynaha waa inay xil iska saaraan sidii ay gacan uga geysan lahaayeen abuurista jawi shaqo iyo waxbarasho amaan leh. Dhamaantooda waa inay u hogaansamaan shuruucda amaanka, qawaaniinta, iyo xeerarka inta ay ku jiraan hantida Degmada ama ka qayb qaadashada ganacsiga ama hawlaha Degmada.

Shaqaalaha waxay mas'uul ka yihiin inay si degdeg ah u soo sheegaan maamulka xaalad kasto oo amaan ah si loo saxo. Dhamaan kuwa kale waxaa lagu dhiirigelinayaa inay soo sheegaan xaalad kasto oo ay aaminsan yihiin inaysan amaan u ahayn xubin shaqaale ama maamul.

Gudiga waxa uu u ogolaadaa Kormeeraha guud iyo wakiiladooda in ay si wada jir ah ula shaqeeyaan waaxyaha kala duwan ee Degmada si ay u hormariyaan barnaamij lagu saxaayo iyo si firfircoon leh wax looga qabto walaacyada amaanka ee dhabta ah iyo kuwa imaan karo.

Barnaamijka waa in lagu daraa ka hortaga shilalka Degmada oo dhan, ka hortaga dabka, ilaalinta hantida, amaanka kuleelinta iyo amaanka shaqaalaha. Ugu yaraan, barnaamijkaan waxaa ku jiri doono:

1. Habab lagu hubinaayo dhamaystirka tababarka amaanka Gobolka iyo Federaalka ee waajibka ah;
2. Habab lagu soo sheegaayo walaacyada ama qataraha amaanka ee la arkay;
3. Habab lagu dabagalaayo dhacdooyinka iyo shilalka, oo ay ku jiraan sheegashooyinka magdhawga shaqaalaha, ee dhici kara;
4. Habab iyo waqtiyo lagu kormeero dhismayaasha iyo dhulka;
5. Habab iyo waqtiyo lagu baaro gaadiidyada Degmada;
6. Habab lagu qiimeeyo iyo lagu hirgeliyo talooyinka caymisyada;
7. Habab lagu qaybiyo iyo lagu gudbiyo macluumaadka amaanka shaqaalaha; iyo
8. Talooyin ku saabsan hababka xakamaynta dhuminta.

Kormeeraha guud iyo wakiiladooda waa in ay dib u eegis ku sameeyaan barnaamijka amaanka sanad walbo iyo waa in ay warbixinta u gudbiyaan Gudiga.

<u>Barnaamijka Amaanka Iskoolka Dadweynaha ee Dhameystiran</u>

Iyadoo la raacaayo sharciga gobolka, Gudiga waxay dib u eegis ku samayn doonaan Barnaamijka Amaanka Iskoolka Dadweynaha ee Degmada si ay ugu hogaansamaan shuruudaha sharciga ah ee gobolka. Barnaamijka Amaanka Iskoolka Dadweynaha ee Dhamaystiran waa inay ku jiraan ugu yaraan qaybaha soo socdo:

1. In la qabto Xog Aruurin Xaalada Dhismaha ugu yaraan shantii sano mar ee dhismo iskool kasto oo lagu jiro;

2. In la kormeero araga sanadlaha ah ee dhamaan dhismayaasha iskoolada lagu jiro, sida sharciga u baahan yahay; ama

3. In nidaamka lala socodo si loo raadraaco amaanka iyo xaalada dhamaan dhismayaasha iskoolada lagu jiro.

Kormeeraha guud waxoo dejin doonaa xeerar ku saabsan Barnaamijka Amaanka Iskoolka Dadweynaha ee Dhamaystiran ee Degmada, oo ay ku jiraan:

1. Sameynta Gudi Caafimaad iyo Amaan ee Degmada oo dhan oo ka kooban wakiilo ka socdo Maamulka, shaqaalaha, qeybaha gorgortanka, iyo waalidiinta. Xeerka waa inoo qeexaa doorka iyo hawlaha ay qabtaan Gudiga Caafimaadka iyo Amaanka, oo ay ku jiraan:

    a. Latalinta hormarinta qiimeynta amaanka sanadlaha ah ee xarumaha Degmada; iyo
    b. Caawinta samaynta habab baaris iyo xalinta cabashooyinka la xiriiro caafimaadka iyo amaanka xarumaha Degmada;

2. Abuurista qorshe dhisme oo shan sano ah, kaas oo ah in la cusboonaysiiyo sanad walbo laguna salaysiinaayo qiimaynta amaanka xarun kasto oo Degmo;

3. Samaynta kormeerka sanadlaha ah ee dhismaha sida uu u baahan yahay sharciga gobolka iyo samaynta Xog Aruurinta Xaalada Dhismaha ugu yaraan hal mar dhismo kasto oo Degmada ah;

4. Isticmaalka nidaamka qiimeynta amaanka ee lagu dhisay Xog Aruurinta Xaalada Dhismaha si loo aqoonsado iyo loo kormeero amaanka iyo xaalada xarumaha Degmada sanad walbo iyadoo la raacaayo sharciga iyo xeerka gobolka; iyo

5. Abuurista hab lagu baaro iyo lagu xaliyo cabashooyinka la xiriiro caafimaadka iyo amaanka. Ugu yaraan, habkaan waxaa ku jiri doono:

    a. Bixinta jawaab qoraal ah dhamaan cabashooyinka qoran;
    b. Sharaxaada baaritaanada, kormeerida ama imtixaanada la sameeyay si loo xaqiijiyo cabashada ama bixinta sharaxaad sababta baaritaan dheeraad ah, kormeer ama imtixaan loogu baahnayn;
    c. Bixinta natiijooyinka baaritaan kasto, kormeerida ama imtixaanada la xiriiro cabashada; iyo

d. Sharaxaada talaabooyinka la qaaday si loo xaliyo dhibaatooyinka.

Gudiga Waxbarashada waxay qaadan doonaan talaabooyinka soo socdo si ay ula socdaan xaalada xarumaha Degmada si loo hubiyo inay amaan yihiin iyo in ay ku sugan yihiin xaalad dayactiran oo wanaagsan:

1. Dib u eegista warbixinada kormeerka dhismaha sanadlaha ah iyo Xog Aruurinta Xaalada Dhismaha, kaas oo ku xirnaan doono ansixinta Gudiga;
2. Qaadashada talaabo degdeg ah si loo xaliyo xaaladaha halista ah ee saameeyo caafimaadka iyo amaanka dhismayaasha iskoolada, iyo wargelinta talaabooyinkaan Gudoomiyaha Waxbarashada Gobolka New York;
3. Dib u eegista cusboonaysiinta sanadlaha ah ee Degmada ee qorshaha xarumaha dhismaha ee shanta sano ah, kaas oo ku xirnaan doono ansixinta gudiga; iyo
4. Baaritaanka natiijooyinka Kormeeraha guud ee sanadlaha ah ee barnaamijka amaanka Degmada.

Tixraac aan toos aheyn:
Goolasha Hormarinta Xarumaha (7000)
Xeerka Hogaaminta Amaanka Lead ka (7010)
Isticmaalka Bulshada ee Iskoolada (7050)

Tixraac:
Sharciga Waxbarashada NYS §409-d (Barnaamijka Amaanka Dhismaha Iskoolada Dadweynaha ee Dhamaystiran)
Sharciga Waxbarashada NYS §409-e (Xeerka isku midka ah ee Kormeerka Dhismayaasha Iskoolada Dadweynaha, Qiimaynta Amaanka, iyo Kormeerka)
8 NYCRR Qaybta 155 (Xarumaha Waxbarashada)
9 Qaybaha NYCRR 600-1250 (Xeerka Ka Hortaga Dabka iyo Dhismaha Si Isku Mid)

Xasuus qoraal:
Nidaamkii hore, Buuga Siyaasada, Amaanka Iskoolka (Agoosto 20, 1998); Dib loo eegay; Wax laga bedelay Diseembar 16, 2010 iyadoo la raacaayo Qaraarka No. 2010-11: 433; Wax laga bedelay Oktoobar 27, 2016 iyadoo la raacayo Qaraarka No. 2016-17: 298; Wax laga bedelay Maajo 23, 2019 iyadoo la raacaayo Qaraarka No. 2018-19: 918; Wax laga bedelay Maarso 23, 2023 iyadoo la raacaayo Qaraarka No. 2022-23: 555

ct/sg